

Bari hore, ayaa waxaa jiray afar qoys kuwaas oo ku noolaa tuulo yar oo Soomaaliya ku taala. Qoyska koobaad way murmaan maalintii oo dhan, qoyska labaad waxuu aah ku honguri wayn, qoyska sadexdaad waxay badanaa kaga maqanyihiin tuulada sahamin sababtoo ah waligood kuma ayna qancin waxa ay haysteen ama meesha ay ku noolaayeen. Laakiin qoyska afraad waxuu ahaa mid dagan oo samir leh, waxayna ku raaxaysteen noolasha dhextaala bulshadooda yar.

Habeyn, gabadha qoyska sadaxaad ayaa u baxday sahamin markii ay heshay ceel ku qarsoon geedo dhexdood duurka. Gabadhii waxay si dhakhso ah oogu soo noqotay qoyskeedii waxaynaa u sheegtay ceelkii sidaa darteedna waxay bilaabeen inay biyahooda ka dhaansadaan ceelka.

Ma ayna fageyn goortii ay maqleen qoysaska kale warka ceelka, waxayna si dhakhso ah afarta qoysba ka dhaansanayeen biyahooda ceelka ilaa uu ka gudhay.

Tani waxay sii socotay muddo, waxayna ahayd mid muuqata in biyaha ceelka ay sii yaraanayeen, wali qoysna ma rabo inuu joojiyo isticmaalidda ceelka maadaama uu ku dhawyahay tuulada waxaana laga waday taas inayna u dhaqaaqin inay helaan biyo kuwaas ooy u isticmaalaan inay cabaan ooy ku karsadaan ooy isku nadiifiyaan.

Maalin, ayaa nin garaad ah, kaasoo badanaa ogaada siraha ceelka, ayaa qoys kasta la hadlay. Garaadku waxuu u sheegay, 'Caawa waa inaad joogtaan guryihiina. Waa in iidna ka dhaansan ceelka habeenka oo dhan, qaabkaas biyuhu waxay heli doonaan wakhti ay ku soo maaxdaan.'

Qoys kasta waxuu oggolaaday inuu ka joogo ceelka, gaar ahaan sida uu garaadku oogu digay in la marin doono ciqaab daran qoys kasta oo u hogaansami waaya sharcigan.

Laakiin markii habeenku madoobaaday, wiil qoyska koobaad kama hor imaan booqashada ceelka asagoo doonayay inuu hubiyo inuu helo biyo buuxa maalinta soo socota sidaa darteed qoyskiisu iskuma khilaafin kaasoo u galayay socdaal dheer ceelka caadiga ah ee ay isticmaalaan dadka kale ee tuulada. Waxuu aaday ceelka asagoo

xanbaarsan labo haamood oo waaweyn wuuna ku buuxiyay labadoodiiba xagga sare inta uuna ku soo noqon gurigiisa wuxuuna ku qariyay haamaha meel aan laga arkeynin.

Mar aan sii fogeyn, sidoo kale wiilka qoyska labaad ayaa aaday ceelka waxuuna ka buuxiyay labo haamood oo waaweyn xagga sare maadaama uu ahaa mid hunguri badan waxuuna u rabay biyaha qoyskooda oo kaliya.

Ka dib sidoo kale gabadha qoyska sadexaad waxay aaday ceelka maadama ooyna khilaafsanayn sahaminta habeynkii waxaana macquul ahayd inay ahayd midda heshay ceelka markii oogu horeysay sidaa darteed waxaa lahaa qoyskeeda kaasoo u qalmay biyaha dheeriga ah inkastoo uu soo jeediyay digniin garaadka.

Maalintii xigtay, garaadku waxuu booqday ceelka waxayna ahayd mid murugo leh in la helo in uu gabi ahaan gudhay. Waxuu sugay ilaa uu ka ogaaday in dhamaan qoysasku aay ka baxeen guryahooda, hadaba waxuu booqday guri kasta si xidhiidh ah.

Guriga koobaad waxuu ka helay labo haamood, mid ka mid ah way madhnayd, laakiin ta kale waxaa ka buuxay biyo laga soo xaday ceelka. Markii uu booqday guriga labada iyo kan sadexaad sidoo kale wuxuu helay haamo biyo ah oo ku qarsoon meel qofna ka arkayn. Laakiin markii uu booqday guriga afraad waxuu helay in ay haamuhu qalalanyihiin waxuuna yaqiinsaday in qoyska samirka leh ay xalay oo dhan gurigooda jooheen. Waxay u hogaansameen digniintiisa waxayna iska daayeen ceelka sidaa darteed biyuhu way soo maaxan karaan markale.

Garaadku waxuu oogu yeedhay dhamaan afarta qoys goobta kulanka ee tuulada asagoo u soo jeediyay arintii ceelka. 'Dhamaan sadexdiina qoys waxaad ka xadeen ceelka biyo anoo xataa idiin sheegay inaan la sameyn,' ayuu ku yidhi garaadku hadal kulul. 'Waan ogaaday tan sababtoo ah waxaan booqday guryihiina saaka waxaanan helay haamo biyo ah. Maadaama ood diideen amaradaydii waxaa laydinku khasbi doonaa si ganaax ah inaad joogtaan guryihiina soddon maalmood iyo soddon habeyn cunno ama biyo la'aan. Waxaan rajaynayaa in aad xilligan ka fakiri doontaan khaladka aad sameyseen.'

Qoyska afraadna waxuu ku yidhi, 'Waxaad u hogaansanteen talooyinkaygii waaxdna joogteen gurigiina xalay oo ma iidna tagin ceelka. Qaata warqaddan oo fura marka aad tagtaan gurigiina.'

Qoyska afraad waxay qaateen warqadda waxayna ku noqdeen guriga. Markii ay fureen warqadda waxaa jiray gudaheeda khariidad. Qoyska waxay raaceen tilmaamaha khariidadda socdaal maylal badan ah ka dibna waxay heleen ceel ay ku xeendaabanyihiin geedaha midhaha leh oo badan iyo dhirta qudradda ah. Waxaa jiray cunno iyo biyo ku filan qoyska cimrigooda oo dhan!

Qoysaskii lagu ganaaxay inay joogaan guryahooda cunno iyo biyo la'aan waxay barten cashir lama ilaawaan ah maalintaas. Waxay barten in ay marwalba ay wanaagsaneyd in la maqlo talooyinka odayaasha oon la sameynin waxyaabo marka lagu sheego inaad sameyn. Waxay kaloo yaqiinsadeen in qoyska afraad lagu abaal mariyay samirkooda iyo u diyaar noqoshadooda inay raacaan sharciyada taasoo bulshada faa'iido u leh.